Dhiirigelinaya Daryeel loo Siman Yahay

Cabirada Dhiirigelinta CCO / barkad tayeysan oo 2022-2027

Laga soo bilaabo 2013, Barnaamijka Dhiirigelinta Tayada ee Oregon waxa uu ku salaysan yahay qayb ka mid ah lacagaha ururrada daryeelka la isku duway (CCOs) ee si fiican u gutaan cabbirada caafimaadka qaarkood ama sida ay u bixinayaan daryeelka xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) ee loogu talogalay. Cabiradaan caafimaadka ayaa caadi ahaan isbadelaa waxyar sannad walba. Barnaamijka wuxuu fiiriyaa waxyaabaha sida tayada xubnaha daryeelka caafimaadka OHP ay helaan iyo haddii ay ka heli karaan daryeelka caafimaadka meesha saxda ah iyo waqtiga ku haboon.

Ka dhaafida cusub, Oregon waxay qorsheyneysaa inay ku dhisaan guusha barnaamijka iyaga oo ku darayo xoog saarida cabirada sheegaa xaqiiqaha kore ee saameynayo sinnaanta caafimaadka.

Xeeladaha muhiimka ah ee wax looga qabanayo sinnaan la'aanta caafimaad iyadoo loo marayo cabirada

1. **Dib-ugu-qaabinta Barnaamijka Dhiirigalinta Tayada laba qaybood oo isdhammaystiraya**

   Oregon waxay rabtaa inay hubiso in dhammaan xubnaha Qorshaha Caafimaadka Oregon ay raadin karaan oo ay ka heli karaan daryeelka caafimaadka tayada sareyso. Waxay sidoo kale qorshaynaysaa inay mudnaanta siiso dadka ku jira bulshooyinka wajaho sinnaan la'aanta hadeer iyo tan taariiqiga ah. Si loo hubiyo in labadaba ay helaan dareen ku fillan, Oregon waxay qorsheyneysaa inay u kala goyso barnaamijka cabiradooda hadeer labo qeybood: kore iyo hoosba. Waxaynu ugu yeernaa "kore iyo "hoose" waayo waa sida webi—iyadoo diiradda la saarayo waxyaalaha *sababa* caafimaadka xumo, waanu qaban karnaa oo wax kaga qaban karnaa kahor inayna ka soo muuqan "gudbinta hoose" sida natiijooyin caafimaad oo sii liita.

Cabirada kore iyo hoose



Kore

Sababaha asalka ah ee sinnaan la'aanta caafimaadka. Cabiradaan waxay xooga saarayaan waxyaabaha sida xaqiiqaha dhaqaalaha bulshada iyo aaminaadaha takoorida. Tusaale ahaan: *Helitaanka Luuqada Wax ku oolka ah ee Dhaqan ahaan Daryeelka Jawaabta leh.*

Hoose

Daryeelka caafimaadka. Cabiradaan waxay xooga saaraan waxyaabaha sida baaritaanada, daaweynada cudurada raaga iyo tallaalada. Tusaale ahaan: *Xakameynta Dhiig Karka Sareeyo.*

Cabirada gudbinta kore

Hal qeyb oo barnaamijka dhiirogelinta wuxuu ka koobnaanayaa cabirada sheegaa sinnaanta caafimaadka. Cabiradaan waxay xooga saarayaan upstream si lagu saxo cadaala darada taariiqiga ah iyo casriga ah. Hal tusaale waa cabirka oo fiiriyo adeegyada daryeelka caafimaadka ee dhaqan ahaanta jawaabta u ah ee luuqada doorbiday xubinta OHP.

Cabirada gudbinta hoose

Qaybta kale ee barnaamijka dhiirigelinta ayaa la jaan qaadi doontaa cabirada caafimaadka caadiga ah ee ay isticmaalaan hay'adaha Medicaid ee wadanka oo dhan. Cabirada caadiga ah ee caafimaadka sida kuwan oo kale waxaa mar hore looga baahan yahay wakaaladda federaalka ee kormeeraysa Medicaid, Xarumaha loogu talagalay Medicare iyo Adeegyada Medicaid. Cabiradaan waxay xooga saaraan daryeelka caafimaadka aad dhaqanka ugu xiran, sida sonkorta iyo booqashooyinka fayo qabka canuga.

2. Dib-ugu qeybinta awoodda go'aan-qaadashada bulshada

OHA waxay rumaysan tahay in dadka ka tirsan bulshada la kulma sinnaan la'aanta caafimaadka ay u baahan yihiin inay yeeshaan awoodda ay go'aano uga qaadan karaan waxa la horumarinayo iyo sida loo horumarinayo. Si ay gacan uga gaysato in tani dhacdo, OHA waxay qorshaysay inay la shaqayso Sharci-dejinta si ay u baddasho Guddiga Cabbirada Tayada Qorshaha Caafimaadka oo ay ka dhigto Guddiga Cabbirada Tayada Sinnaanta Caafimaadka (HEQMC). HEQMC waxay diiradda saari doontaa dadka saamaynta ugu badan ka soo gaarto sinnaan la'aanta caafimaadka: Xubnaha OHP, xubnaha bulshada ee ka soo jeeda bulshooyin kala duwan, shakhsiyaadka la kulmay sinnaanta caafimaadka, iyo xirfadlayaasha iyo cilmibaarayaasha sinnaanta caafimaadka.

3. Dib uga fekerka qaabdhismeedka dhiirigalinta si sare loogu qaado sinnaanta

HEQMC iyo Guddiga Cabbirada iyo Qiimaynta waxay xulan doonaan cabbirada ay tahay in la dhiirigaliyo si loo horumariyo sinnaanta caafimaadka sida ugu badan. Si gacan loogu gaysto in Guddigu go'aansadaan, OHA waxay bixin doontaa xogta qoomiyadda, isirka, luuqadda iyo naafonimada. Waxay u isticmaali doonaan macluumaadkaas inay go'aamiyaan sida loogu qaabaynayo barnaamijka dhiirigalinta qaab ku dhiirigalinaya CCOs inay siiyaan xubnaha OHP daryeel tayadiisu sarrayso oo loo siman yahay.

Waxa ay tani uga dhigan tahay xubnaha OHP

Ka dhaafidda cusub marka la eego, xubnaha OHP iyo bulshooyinku waxay yeelan doonaan cod sidii hore ka dheer marka la eego barnaamijka dhiirigalinta tayada. Natiijadu waxay noqon in barnaamijku wuxuu cabbiri doonaa oo uu abaalmarinayaa horumarinaha macnaha ugu wayn u leh bulshada oo fursaddaha ugu waynna siinayo horumarinta natiijooyinka caafimaadka.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Community Partner Outreach Program community.outreach@dhsoha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.